JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# DOWLADDA HIRSHABELLE,

## XEERKA QOONDEYNTA MIISAANIYADDA 2025-KA

## TIRSI 001
## HALKU DHIGA MIISAANIYADA 2025-KA

**"HIIGSIGEENU WAA ISKU FILNAASHO"**

XEERKA QOONDEYNTA MIISAANIYADDA 2025-KA

EE MUDDADA KA BILAABATA 1DA JANNAAYO 2025 ILAA 31KA DISEMBAR 2025

XEERKA QOONDEYNTA LR.1, 2025

*Xeerka Sanduuqa Maaliyadda Mideysan ee Dowlada Hirshabellele ee loogaga qoondeynayo dhaqaale lagu bixiyo kharashaadka 12ka bilood ee ka bilowda 1 Jannaayo 2025 ilaa 31 Disembar 2025*

*Oo uu Wasiirku u soo saarey sida tan:*

CUTUBKA KOOWAAD

QODOBBO HORDHAC AH

Qaybta 1aad: Magaca Xeerka iyo Waqtiga uu Dhaqan gelayo

Xeerkan magaciisu yahay “Xeerka Qoondeynta Lr. 1, 2025” waxaa uu dhaqangelayaa taariikhda la saxiixo.

**Qaybta 2aad: Qeexid**

Xeerkan dhexdiisa, haddii aaney xaaladdu macno kale u sameyneyn, ereyadan iyo oraahahan soosocda waxaa ay yeelanayaan macnaha halkaan lagu siiyey:

**"Sanduuqa Maaliyadda Mideysan"**waxaa loo lajeedaa sanduuqa ay ku mideysanyihiin dhammaan dakhliyada Dowladda Hirshabelle waxaana loo adeegsadaa in laga bixiyo lacagaha, sida ku qeexan Qaybta 4aad ee Xeerkan;

**"Golaha Shacabka Ee Dowlada Hirshabelle"** waxaa loolajeedaa aqalka keliya ee sharci-dejinta dowlada ka Hirshabelle.

**"Madaxweynaha"**waxaa loo lajeedaa Madaxweynaha Dowladda Hirshabelle

**CUTUBKA LABAAD**

**QOONDEYMO**

**Qaybta 3aad:**

**Lacagaha Laga Qoondeeyey Sanduuqa Maaliyadda Mideysan**

Kharashaadka Sanad-Maaliyadeedka ka bilowda 1daJannaayo 2025 ilaa 31kaDisembar 2025 waxaa Sanduuqa Maaliyadda Mideysan looga qoondeeyey si waafaqsan ujeeddooyinka iyo qaddarka (tirada) lagu muujiyey Jadwalka 1aadee kulifaaqan Xeerkan.

**Qaybta 4aad: Xaddidaadaha Kharashaadka**

Iyada oo la raacayo Qaybta 22aad ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka (PFM ACT) marka lagareebo hawlgallada ku-meelgaarka ah ee maareynta lacagaha khasnadda iyo kuwa waafaqsan xeerarka guud, waa in aan lacag laga bixin Sanduuqa Maaliyadda Mideysan marka lagareebo shey lagu aqoonsadey qiyaasaha miisaaniyad-sanadeedda

2025 ee kuyaalla Jadwalka 1[aad], oo hadba muddo ka dib wax loogaga beddelayo u kala-wareejinta lacagaha miisaaniyadda dhexdeeda. Iyadaoo xaddidaad jirto, ayaa haddana adeeqaha aan horey loogu sii saadaalin ee deeq-bixiyeyaasha ama lacagta ay soo wareejiso Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS) ee Maaliyadda Mideysan loogushubo ujeeddooyin la cayimey ayaa loo qoondeynkaraa loona kharash-gareynkaraa ujeeddooyinkaas. Haddii ujeeddada la cayimey aaney horey ugu jirin Jadwalka 1[aad] ee Xeerkan qaddar lacageed oo u dhiganta deeqda deeq-bixiyaha ee lagushubey xisaabta ayaa loo arkayaa in la qoondeeyey waxaana loo sameynayaa xarriiq miisaaniyadeed (*budget-line)* si ay u saamaxdo in kharashka la bixin karo.

Heshiisyada deeqda Deeq-bixiye lalagalo ama lacagwareejin Dowladda Federaalka laga helo ka dib 1[da]Nofembar ee Sanad-Maaliyadeedka ka horreeya Sanad-maaliyadeedka Xeerkan uu la halmaalo ee aan weli la kharash-gareyn wixii loo gaaro dhammaadka Sanad-maaliyadeedka ka horreeya kan uu Xeerkan la halmaalo waxaa loo arrkayaa in ay yihiin deeq uu bixiyey deeq-bixiye oo aan la sii ogeyn waxaana loo qaadanayaa in la qoondeeyey 1[da]Jannaayo ee Sanad-Maaliyadeedka ee Jadwalka 1[aad] ee Xeerkan uu kuhabboonyahay waxaana loo sameynayaa shey xarriiq miisaaniyadeed (*budget line item*) si uu u saamaxdo in kharash-gareyntu ay dhicikarto.

## Qaybta 5[aad]: Kharashaadka Waxaa Xaddidaya Dakhliga

Khasnajigu waa in uu bixiyaa maaliyado ama lacago la kharash-gareeyo oo ku sargo'an dakhliga ama ilaha kale ee maaliyadeed ee Xisaabta Keliya ee Khasnadda Dowlada Hirshabelle – Miisaaniyadda Caadiga ah si loo kharash-gareeyo.

Qaybta 6[aad]: Wax-ka-beddelka Yar ee Qaddarka/Tirada Lacagaha La Ansaxiyey

Khasnajigu waxaa uu qadarada/tirooyinka lacagaha la ansaxiyey u kala wareejinkaraa qaybaha miisaaniyadda ee Wasaarada ama Wakaalad/Hay'ad Leedahay ee kujira Jadwalka 1[aad] ee Xeerkan, waase marka dib-u-qoondeyntu aaney kabadneyn, wadarahaan, 10% qaybta wax lagaqaadayo. Lacagaha loo kala wareejinayo Wasaaradaha lama oggolaanayo iyadaoo aan wax-ka-beddel lagu sameynin Jadwalka 1[aad] iyada oo loo marayo tallaabooyin Qoondeymo Dheeri ah.

Sharciyada sare waxaa laga soo reebey mashaariicda uu deeq-bixiye maalgelinayo ee lagu darey Jadwalka 1[aad] ee Xeerkan, ee maaliyadda deeq-bixiyaha ee aan loo qoondeynin Wasaarad ama la siinin summad qoondeyn oo ay ku xirantahay oggolaanshaha uu deeq-bixiyuhu oggolaadey in uu soo mago lacagta ama inta lagu jiro uu deeq-bixiyuhu dad u soo sheego wax-ka-beddel lagu sameeyo qoondeynta miisaaniyaddii asalka ahayd. Sidaa daraaddeed, haddii ay horey u ansaxiyeen deeq-bixiyaha iyo Khasnajiga, dib-u-kala-qoondeynta loo kala qoondeynayo laymanka miisaaniyadda ama wasaaradaha waa ay dhicikartaa iyadaoo ah qaddarka/boqolleyda lagu heshiiyey, iyada oo aan lagu maamuleynin xakameynta kor lagu xusey.

Qaybta7$^{aad}$:Kharashaadka Ku-talogalka ah

Iyadaoo la raacayo Qaybta 14$^{aad}$ ee Xeerka Maareynta Maaliyadda , 2025 Qoondeynta Ku-talogalka ah waxaa lagu bixin karaa kharashaadka degdegga ah ee aan la sii ogeyn ee ka dhasha xaalado degdeg ah oo lacagta lagu bixinayana aan dib loo dhigikarin ilaa laga ansaxiyo miisaaniyad dheeri ah ama Miisaaniyad Sanadeedda soo socota iyada oo aaney taasi raadad ba'an kuyeelan danta dadweynaha.

Qeybta 8aad: Miisaaniyadda Guud & Illaha laga filaayo:

| # | Qeybaha | Wadarta |
|---|---|---|
| 1 | Dakhliga Gudaha | 8,026,024.13 |
| 2 | Deeqaha & Taageerada Miisaaniyadda | 25,531,806.25 |
| | Wadarta Guud | **33,557,830.37** |

Waxaa la saxiixay maanta oo ay taariikhdu tahay ______________ bisha ____Disembar Sanadka 2025.

-------------------------------------

Madaxweynaha Dowladda Hirshabelle

Cali Cabdullahi Xuseen (Cali Guudlaawe)

# LIFAAQA MIISAANIYADDA ,2025